

Saamiga xaakada ee loo qaadaayo beeritaanka bakteeriyada awgeed

Waxaayabaha saamigu u baahan yahay

Shaqaalaha rugta caafimaadka/isbitaalka ayaa adiga ku siinaaya qasaca lagu qaado saamiga xaakada, bacda lagu xiraayo iyo sharootada magaca.

Saami qaadista

Iska qaad saamiga xaakada subaxdii ka hor inta aadan wax cunin.

Afka biyo ku luquqo oo iska soo tuf. Si xoog leh u qufac, adigoo isa soo godaya oo hore u soo foorarsanaaya, si ay suurtaggal kuugu noqoto in xaako le'eg qaadada cuntada oo adag aad si toos ah ugu shubto qasaca saamiga.

FIIRO GAAR AH! Lama rabo xaako dareereysa ama xumbaynaysa.

Xir qasaca, adigoo si taxaddar leh u maroojinaaya furka.

Waa muhiim in la aqoonsado qofka iska leh qasaca saamiga, sidaas awgeed sharootada magaca waxaad ku dhajisaa qasaca saamiga, waxaadna ku qortaa magacaaga, taariikhdaada dhalashada iyo lambarkaaga aqoonsiga iyo saacadda ama wakhtiga aad iska qaaday saamiga. Si taxaddar leh qasaca u geli bacda oo ku xir.

Saamiga si dhakhso ah u gee shaybaarka, waxaa aad u wanaagsan in la geeyo 2 saacadood gudahood laga soo bilaabo wakhtiga saamiga la qaaday. Haddii uusan arrinkaan suuraggal kuu ahayn, saamiga waxaa la gelin karaa ama lagu kaydin karaa heerkulka tallaajada ama qaboojiyaha. Saamiga waa in uusan baraf noqon. Saamiga waa in la keenaa shaybaarka ugu dambayn 24 saacadood gudahood laga soo bilaabo wakhtiga saamiga la qaaday. Waa muhiim in saamiga si dhakhso ah loo geeyo shaybaarka, waayo saamigu uma adkaysan karo kaydinta.

Macluumaad dheeraad ah

Haddii aad qabto wax su'aa ah, waxaad soo wici kartaa lambarka adeegga tel. 09 471 86800 isniin-jimco 7.30–15.30. Waxaan aad uga xunnahay in jawaabta shaybaarka aannaan ku bixin karin lambarkaadeegga.